


Xiritaanka kaabadda Montlake Bridge

Wiikeendiyada xilliga Dayrta

Dhowr wiikeendi ama Sabti iyo Axad ee bilaha Setembar, Oktoobar iyo Noofembar, kaabadda Montlake Bridge - kaabadda ku xiran waddada SR-513 ee isku xirta Montlake iyo Degmada Jaamacadda (University District) - ayaa laga xiri doonaa gaadiidka *oo dhan*, xataa baabuurta, dadka lugaynaya iyo baaskiillada. Booqo wsdot.wa.gov/projects/sr513/Montlake-bridge si aad u ogaato taariikhaha iyo macluumaadka xiritaanka.

Tani ma saamayn doonto gaadiidka tareenka fudud.

Waqtiga xiritaanka, waqti dheeraad ah ugu talagal si aad u gaarto isbitaalka Seattle Children's. Fadlan soo xaadir 15 daqiiqo ka hor ballantaada si aad waqti ugu rukhsayso diiwaangelinta.



Tilmaamaha lagu tago Xerada Ugu Muhiimsan ee Isbitaalka Seattle Children's

4800 Sand Point Way NE, Seattle, WA 98105

Ka imanaya I-90 Galbeed iyo I-5 Waqooyi:

- Qaado waddada I-90 Galbeed oo ka gudub kaabadda Mercer Island Floating Bridge.
- Qaado waddada I-5 Waqooyi ilaa Irida 169 ee lagu gaaro dariiqa NE 45th Street.
- Ku biir dariiqa 7th Avenue NE.
- Midig ugu leexo dariiqa NE 45th Street.
- Raac dariiqa NE 45th Street ilaa aad dhaafayso jaamacadda University of Washington oo aad ka degayso gunbur ballaaran ama buur.
- Gunburka ama buurta hoosteeda, bidix uga leexo iftiinka istaagga oo ku sii soco dariiqa NE 45th Street.
- Dariiqa NE 45th Street waxuu u laabmi doonaa dhanka bidix waxuuna isku beddeli doonaa dariiqa Sand Point Way NE.
- Midig ugu leexo dariiqa Penny Drive si aad u gasho xerada isbitaalka (hospital campus) ee Seattle Children's.

Ka imanaya I-5 Koonfur:

- Qaado waddada I-5 Koonfur ilaa Irida 169 ee lagu gaaro dariiqa NE 45th Street.
- Dhanka bidix ku jir oo raac calaamadaha tilmaamaya NE 45th Street/University of Washington.
- Ku biir dariiqa 5th Avenue NE.
- Bidix ugu leexo dariiqa NE 45th Street.
- Raac dariiqa NE 45th Street ilaa aad dhaafayso jaamacadda University of Washington oo aad ka degayso gunbur ballaaran ama buur.
- Gunburka ama buurta hoosteeda, bidix uga leexo iftiinka istaagga oo ku sii soco dariiqa NE 45th Street.
- Dariiqa NE 45th Street waxuu u laabmi doonaa dhanka bidix waxuuna isku beddeli doonaa dariiqa Sand Point Way NE.
- Midig ugu leexo dariiqa Penny Drive si aad u gasho xerada isbitaalka Seattle Children's.

Ka imanaya WA-520 Galbeed:

Waddo Canshuur leh: Kaabadda WA-520 waxaa laga bixiyaa canshuur gaari karta \$6.30 halkii dhinacba. Waxaad biil ku heli doontaa boostada haddii aadan haysanin baaska ama kaarka **Good to Go** lagu magacaabo.

- Qaado waddada WA-520 Galbeed oo ka gudub kaabadda Evergreen Point Floating Bridge.
 - Qaado oo ka bax iridda lagu gaaro waddada I-5 Waqooyi.
 - Qaado waddada I-5 Waqooyi ilaa Irida 169 ee lagu gaaro dariiqa NE 45th Street.
 - Ku biir dariiqa 7th Avenue NE.
 - Midig ugu leexo dariiqa NE 45th Street.
 - Raac dariiqa NE 45th Street ilaa aad dhaafayso jaamacadda University of Washington oo aad ka degayso gunbur ballaaran ama buur.
 - Gunburka ama buurta hoosteeda, bidix uga leexo iftiinka istaagga oo ku sii soco dariiqa NE 45th Street.
 - Dariiqa NE 45th Street waxuu u laabmi doonaa dhanka bidix waxuuna isku beddeli doonaa dariiqa Sand Point Way NE.
 - Midig ugu leexo dariiqa Penny Drive si aad u gasho xerada isbitaalka Seattle Children's.
-

Tilmaamaha lagu tago Kiliniigga Sand Point ee isbitaalka Seattle Children's

4575 Sand Point Way NE, Seattle, WA 98105

- Raac tilmaamaha lagu tago xerada isbitaalka Seattle Children's.
- Halkii aad midig u leexan lahayd marka aad gaarto dariiqa Sand Point Way NE si aad u gasho xerada isbitaalka, bidix ugu leexo xerada baabuurta la dhigto ka hor inta aadan gaarin Kiliniigga Sand Point.

Tilmaamaha lagu tago xarunta xirfadlaha ee Springbrook Professional Center ee isbitaalka Seattle Children's

4540 Sand Point Way NE, Building 1, Seattle, WA 98105

- Raac tilmaamaha lagu tago xerada isbitaalka Seattle Children's.
- Xarunta xirfadlaha ee Springbrook Professional Center waxay ku taallaa dhanka midig ka hor uun inta aadan gaarin xerada isbitaalka. Waxaa dhismaha hoostiisa ku diyaar ah meelo baabuurta la dhigto oo bilaash ah.